



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/564/2021

TR. 16/09/2021

UJEEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB,CADDEYN TARIKO, QAYIM, WAKAALAD GUUD IYO DAMIINU-MAAL.

Maanta oo Ay Taariikhdu Tahay **16/09/2021**, Maxkamadda Degmadda Wadajir horteeda waxaa yimid Wakiilka dhaxaltooyadda **XASAN BARQADLE WARDHEERE IYO MARXUUM XAASHI XASAN BARQADLE**, wuxuuna maxkamadda ka codsaday in loo qoro sugitaan dhaxalkoob, caddeyn tariko, wakaalad Guud ah iyo Qayim, intaas kadib maxkamaddu waxay ka dalabtay in uu keeno laba qofood oo markhaati ah, wuxuuna Maxkamadda hor keenay labada markhaati ee hoos ku xusan ee kala ah:

- 1-) **CABDI SALAAD CIISE**, Somali ah, Ku Dhashay G/kacyo, Sanadkii 1989, Ina Xaawo Diirshe Guuleed, Degan Muqdisho, oo sita Warqad Aqoonsi Lam.0077712, kana soo baxday D/Hoose ee Muqdisho.
 - 2-) **C/QAADIR CABDI XIRSI** Ina Xadiyo Geelle Faradar, Dhashay Sanadkii 1984, Ku Dhashay Muqdisho, Degan Muqdisho oo sita Warqad Aqoonsi Lam.0060790, kana soo baxay D/Hoose ee Muqdisho.
- Dhaar ka dib Waxay maxkamadda si wadajir ah uga hor caddeeyeen ayagoo xis qabi cid qasbaysana aysan jirin in uu geeriyooday **XASAN BARQADLE WARDHEERE**, kuna geeriyooday Muqdisho, Sanadkii 1996, labadiisii waalid iyo xaaskiisiina ay geeri uga Horeeyeen, ayna dhaxalkiisa leeyihiin awlaadiisa oo ka kooban **4-Wiil iyo 5-Gabdhoo**, Waxayna Kala yihiin sidatan.

DADKA.

1-)CABDI	XASAN	BARQADLE	DHASHAY 1973.	(MARXUUMKA WILLKIISII)
2-)C/QAADIR	XASAN	BARQADLE	DHASHAY 1979.	(MARXUUMKA WILLKIISII)
3-)WARDHEERE	XASAN	BARQADLE	DHASHAY 1995.	(MARXUUMKA WILLKIISII)
4-)XAASHI	XASAN	BARQADLE	(MARXUUM).	(MARXUUMKA WILLKIISII)
5-)SAHRO	XASAN	BARQADLE	DHALATAY 1971.	(MARXUUMKA GABADHIISII)
6-)NAFISO	XASAN	BARQADLE	DHALATAY 1964.	(MARXUUMKA GABADHIISII)
7-)BASHIIRO	XASAN	BARQADLE	DHALATAY 1985.	(MARXUUMKA GABADHIISII)
8-)BASHAR	XASAN	BARQADLE	DHALATAY 1978.	(MARXUUMKA GABADHIISII)
9-)XALIIMO	XASAN	BARQADLE	DHALATAY 1982.	(MARXUUMKA GABADHIISII)
10-)CAASHO	XASAN	BARQADLE	DHALATAY 1977.	(MARXUUMKA GABADHIISII)
12-)JMAHDI	XASAN	BARQADLE	DHASHAY 1966.	(MARXUUMKA WILLKIISII)
13-)JISMAACIIL	XASAN	BARQADLE	DHASHAY 1983.	(MARXUUMKA WILLKIISII)

Waxay kaloo markhaatiyaashu caddeeyeen in aysan jirin cid Kale oo dhaxleysa marxuumka hadey noqon laheyd asal ama farac.

Waxay kaloo markhaatiyaashu cadeeyeen in uu geeriyooday **XAASHI XASAN BARQADLE**, kuna geeriyooday Muqdisho, Sanadkii 2021, labadiisii waalidna ay geeri uga horeeyeen xaasna uusan ka tagin uuna dhaxalkiisa leeyahaya 1-wiil oo ah:-

- 1-)SAADAAM
- XAASHI
- XASAN
- DHASHAY 2004.
- (MARXUUMKA WIILKIISII)

HANTIDDA.

Waxay kaloo markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUM XASAN BARQADLE WARDHEERE** uu ifka uga tagay hanti ma guurto ah oo ka kooban Guryo dhisan iyo dhulal banaan oo ku yaal Magaalada Muqdisho ee Caasimada Dalka Soomaaliya.

EEG BOGGA LABAAD



BOGGA LABAAD

WAKIILASHO:-

Waxay kaloo markhaatiyaashu caddeeyeen In dhamaan dhaxaltooyadda sare ku xusan ay wakiisheen **CABDI XASAN BARQADLE**, Somali ah, ku dhashay Muqdisho, sanadkii 1973, Hooyadiisna layiraahto Maryan Siyaad Hubane, Degan Muqdisho, oo sita Warqad Aqoonsi Lam.0066249, sida ku Cad 1-)Warqad wakaalad Guud ah **Rep Lam.SOMEMB/FR/WAK/283/21, Tr.13/09/2021**, kana soo baxday Safaaradda Soomaaliya ee Farance uuna saxiixay Qunsul Ahmed M Haji Ali (Ahmed Shire), 1-)Warqad wakaalad Guud oo ku Taariikhaysan **25/08/2021**, kana soo baxday Madina Legal Services, uuna saxiixay Omar Mohamoud Mohamed, soona martay Safaaradda Soomaaliya ee Washington DC, 3-)Warqad wakaalad Guud ah **Rep Lam.PN/BMH/2010, Tr.22/08/2021**, kana soo baxday Nootaayo Qaarey uuna saxiixay Madaxa Xafiiska Avv Abdullahi Farah Qaarey, Lehna Warqad Damaanad Lam.033/KPN/2021, Tr.16/09/2021, kana soo baxday Nootaayo Kaamil uuna saxiixay DR. Cabdifitax Axmed Cabdulle, 5-)Warqad Wakaalad Guud **Rep Lam.020/KPN/2021, TR.15/09/2021, 6-) 030/KPN/2021, TR.15/09/2021**, kana soo wada baxeen Nootaayo Kaamil, uuna saxiixay Dr. Cabdifitax Axmed Cabdulle, una wakiisheen dhamaantood wakaalad Guud ah in uu u Maamuli karo, dhisi karo, dayactiri karo, kireyn karo, ka saari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karo qof waliba qeybta uu ku leeyahay dhamaan hantida ay ka dhaxleen **MARXUUM XASAN BARQADLE WARDHEERE IYO MARXUUM XAASHI XASAN BARQADLE.**

QAYIM.


Waxay kaloo markhaatiyaashu maxkamadda ka hor caddeeyeen in **MAHDI XASAN BARQADLE IYO ISMAACIIL XASAN BARQADLE** oo ah Labo qof oo xanuunsan oo dhimirla la' oo aan Tasaruf laheyn uu qayim uu iyo Mas'uulba u yahay walaalkood **CABDI XASAN BARQADLE**, isla markaana uu u maamuli karo, kireyn karo, ka saari karo, dhisi karo, dayactiro karo, u doodi karo una dacwoon karo, qareen u qaban karo, maxkamadaha hortoodana u matali karo qeybta ay ku leeyihiin dhamaan hantida ay ka dhaxleen Aabahood **MARXUUM XASAN BARQADLE WARDHEERE.**

DAMIINU-MAAL.

Waxay kaloo markhaatiyaashu maxkamadda ka hor caddeeyeen in ay damiinu-maal buuxa ka yihiin wax allaale iyo wixii ka yimaada dhaxaltooyadda sida in ay jiraan dad dhaxaltooyadda ka mid ah oo laga tagay ama lagu soo daray dad aan ku jirin dhaxaltooyadda, in dhaxaltooyada maqan iyo kuwa joogaba ay wakiisheen Cabdi Xasan Barqadle iyo Wixii ka beenooba in **MAHDI XASAN BARQADLE IYO ISMAACIIL XASAN BARQADLE** ay yihiin labo qof dhimirka la' oo aan Tasaruf laheyn uuna qayim iyo Mas'uulba u yahay kaalintoodana u taagan yahay **CABDI XASAN BARQADLE.**

=SAXIIXYADDA MARKHAATIYAASHA=.

1-) CABDI SALAD CIISE



2-) C/QAADIR CABDI XIRSI



=SAXIIXA WAKIILKA IYO QAYIMKA DHAXALTOOYADDA KANA TIRSAN DHAXALTOOYADDA=

CABDI XASAN BARQADLE



EEG BOGGA SADAXAAD



BOGGA SADAXAAD

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda markay aragtay codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka markhaatiyaasha, Markay aragtay Wakaaladaha ay qoreen dhaxaltooyada maqan iyo kuwa jooga, Waxay Maxkamadda Degmadda Wadajir sugeysaa geerida XASAN BARQADLE WARDHEERE IYO MARXUUM XAASHI XASAN BARQADLE oo ah labo Marxuum oo kala geeri danbeeyey isna dhaxlaya dhaxalkooduna ay leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in CABDI XASAN BARQADLE uu Wakiil Guud u yahay dhamaan dhaxaltooydda sare ku xusan wakiilna uga yahay awooda ay siiyeen ee sare ku xusan oo kaliya awoodaas oo ku saabsan in uu Maamuli karo, dhisi karo, dayactiri karo, kireyn karo, ka saari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karo qof waliba qeybta uu ku leeyahay dhamaan hantida ay ka dhaxleen MARXUUM XASAN BARQADLE WARDHEERE IYO MARXUUM XAASHI XASAN BARQADLE, waxay kaloo Maxkamaddu Wadajir sugeysaa in CABDI XASAN BARQADLE uu qayim iyo Mas'uul u yahay MAHDI XASAN BARQADLE IYO ISMAACIIL XASAN BARQADLE oo ah Labo qof oo xanuunsan oo dhimirla la' oo aan Tasaruf laheyn, isla markaana uu u taagan yahay kaalintooda ku aadan qeybta ay ku leeyihiin Hantida ay ka dhaxleen Aabahood XASAN BARQADLE WARDHEERE awoodaas oo ah in ay gadi karaan, wareejin karaan iyo in ay hibeyn karaan qeybtooda, Waana Sugintaan dhaxalkoob, Caddeyn Tariko wakaalad Guud ah Qayim iyo Damiinu-maal oo ansax ah waafaqsana sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/RISAAQ CALI CABDI "CAABI"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

DR. AXMED MAXAMED CALI

